IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 6aad Muqdisho, 25 Abriile 1978 L. 2 R 4

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.**

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

SHARCI L. 18 ee 6 Abr. 78, Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Xamar. Bogga 207

SHRACI L. 19 ee 10 Abr. 78, Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha. » 214

SHARCI L. 20 ee 10 Abr. 78, Xubno ka tirsan Golaha Dhexe ee lagu Magacaabay Kormeerayaal Gobollada. » 216

### QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 22 ee 31 Agoosto 77, Magdhaw la siinayo dad beero lagala wareegay dan guud awgeed. » 218

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 23 ee 25 Jen. 78, Dhismaha Qaabta Wasaaradda H. Guud. » 220

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 24 ee 13 Maarso 78, in Jaalle Ardo Dhoore Guuleed la siiyo lacag dhan Shs. 35.000/ oo ah magdhaw.- » 222

XEER MADAXWEYNAHA JSD, L. 25 ee 16 Maarso 78, Magacaabid Maareeye Guud ee Wakaaladda Sahayda Maraakiibta Tirada alaabta iyo soo bixinta dhoofinta alaabta. » 224

# QAYBTA KOWAAD

## SHAHRCI

SHARCI L. 18 ee 6 Abr. 78 Dhismaha Wakaaladda Biyaha ee Xamar

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lab. 2 ee 11.12.1967 oo ku saabsanaa «Abuuridda Wakaaladda Biyaha ee Muqdisho»;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 28 ee 20.2.1971, kuna saabsanaa «Dhismaha Wakaaladda Horumarinta Biyaha» iyo la wareegidda iyo hoos imaatinka Wakaaladda Biyaha ee Muqdisho;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in Maamulka Biyaha Xamar uu noqdaa Hay'ad iskeed isu maamusha shaqsiyad qaynuunna lahaato dibna loo habeeyo sharcigii hore ay ku dhisneed oo loo yiqiinay «Wakaaladda Biyaha ee Xamar»;

ISAGOO TIXGELIYAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee XHKS iyo Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

ABUURIDDA WAKAALADDA

Wakaaladda Biyaha Xamar ayaa sharcigan lagu dhisay, waxaana hadda ka dib lagu tilmaamayaa Wakaalad.

Qod. 2aad

Wakaaladdu waxay ka mid tahay Wakaaladaha dawladda ee Madax-bannaan, waxayna leedahay jirid iyo astaan sharci.

Qod. 3aad

Wakaaladdu waxay u hoggaansami doontaa sharciyada iyo xeerarka saameeya Wakaaladaha Madax-bannaan ee Dawladda, gaar ahaan:

b) Xeerka Lr.16 ee 1.4.1970 ee ku saabsan faaqidaadda xisaabaha Wakaaladaha Madax-bannaan;

t) Xeerka Lr. 58 ee 31.7.1972 ee Lacagta Wakaaladaha Dawladda;

j) Xeerka Lr. 36 ee 22.4.1972 ee Shaqaalaha Wakaaladaha Ma-

Qod. 4aad

## MEELEYNTA WAKAALADDA

Wakaaladda Biyaha ee Xamar waxaa lagu meeleeyay derejada ah «B», xarunteedana waxay tahay magaalada Xamar, waxayna ku yeelan doontaa Laamo Degmooyinka uu ka kooban yahay Gobolka Banaadir.

Qodobka 5aad

## UJEEDDADA WAKAALADDA

Ujeeddada Wakaaladda ama xilkeeda wuxuu yahay sida soo socda:

1) Inay sahmiso, soo saarto qaybisana biyo caafimaad qaba oo ku filan Gobolka Banaadir;

2) Inay biyo caafimaadka qaba ka haqab tirto magaalada Xamar (Gobolka Banaadir);

3) Inay u samayso magaalada Xamar dhuumamka Biyaha qaada iyo meelo biyo laga dhaansado;

4) Inay u sameeyso dhuuman biyaha geeya guryaha iyo meelaha caanka ah, iyadoo kiro ka qaadanaysa;

5) Inay ururiso kana faa,idaysato war ururin ku saabsan biyaha dhulka iyo kuwa sare (underground and surfece water date) ee Gobolka

6) Inay si cilmi ah u baarto sida ugu haboon ee biyaha Gobolka loogaga faa,idaysan karo;

7) Inay yeelato awood farsamo oo ay ku fulin karto Mashruuc Biyood oo Gabal, iyadoo ku talo gelayso qorshaynta, dersidda, xaradhka, kormeerka xannaanada wadidda iyo shaybaarka ;

8) Inay habayso, dibadda ka dirto alaabta, qalabka iyo baahitirka hawsheeda la xiriirta;

9) Inay aqoonta shaqaalaheeda kor u dhigto gees kastaba;

10) Inay abaabusho, fuliso, socodsiiso hawshii kale oo loo xilsaaro guud ahaan, gaar ahaan dhismaha Mashruuca «Muqdisho Sawerage»

QOd. 6aad

## AWOODDA IYO XUQUUQDA WAKAALADDA

1. Wakaaladdu waxay leedahay awood buuxda oo ay ku fuliso ujeeddooyinka loo abuuray, xilkeeda iyo xuquuqdeeda sharciga uu siiyey, iyadoo mar waliba dhowreysa kuna dhaqmeysa sharcigan, sharciyada u degsan Wakaaladaha Madax-bannaan iyo mabaa'diida guud ee M...

2. Wakaaladda waxay leedahay xuquuqda soo socda:

a) In loo horeysiiyo baahideeda dhulka iyo baneynta meelaha hawshu ka socoto (public or private right of way or public utility easement);

b) Inay mariso ama ku isticmaasho jidadka ee meel kasta dhuumamka biyaha la marinaayo;

t) In ay sicirka biyaha iyo qiimaha biyo-gelinta turyaha gooyso isla markaana awood ay ku socodsiiyo xeerka biyo-gelinta yeelato, iyo isticmaalka biyaha (service connection regulation);

j) Hadday lagama maarmaan noqoto mashruuca biyo sifayn ah ku dhisto agagaarka webiga Shabeelle ama ceelal ka qodo Gobollada deriska la ah Gobolka Banaadir si magaallo-madaxda biyo ku filan u hesho.

x) Wakaaladdu waxay yeelaneysaa awood oo ah inay saxiixdo heshiisyo la xiriira hawlaheeda oo qodobbadiisa ka mid noqon kara canshuur ka dhaafid hawlaheeda free charges or livies) iyadoo ay kala tashanayso Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda oo oggolaanshahiisa ku xiran tahay;

kh) Xuquuqda, awoodda iyo xilka ku tilmaaman sharciga iyo xeerka hoos ku sheegan oo ku saabsan Dhismaha Wakaalada hore ee Biyaha xamar wixii sharcigan ka soo horjeeda ama uusan la socon mooyee:

i ) Sharciga lamb. 2 ee 11.12.1967 oo lagu dhisay Wakaaladda Dhismaha Biyaha Xamar;

i i ) Xeerka lamb. 181 ee 8.8.1968 ee nidaaminaaya lana xiriira fulinta sharciga dhismaha Wakaaladda hore ee Biyaha Xamar.

Qodobka 7aad

KORMEERKA IYO AWOODDA WASIIRKA

1) Kormeerka Guud ee Wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo biyaha;

2 ) Wasiirka wuxuu awood u leeyahay inuu had iyo jeer siin karo awaamiirta iyo talooyin ku saabsan maamulka sidii sare loogu qaadi lahaa Wakaaladdana waxtar ku noqon lahayd;

3) Isagoo tixgilinaya qod. 1aad ee bedelaadda sharciga lamb. 36 ee 22.3.1972 Wasiirku wuxuu ku leeyahay wakaalada awood iyo mas,uuliyad buuxda sida ku tifaftiran sharciga lam. 17 ee 21.4.1974.

Qodobka 8aad

DHISMAHA WAKAALADDA

1) Wakaaladdu waxaa ka madax noqon doona Maareeye Guud

Qodobka 9aad

MAGACAABID IYO XILKA

1) Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Biyaha Xamar waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saxiixo Madaxwaynaha J.D.S. isagoo tixgelinayaa talada Wasiirka Wakaaladda Macdanta iyo Biyaha;

2) Maareeyaasha waaxyaha Wakaalada Biyaha Xamar waxaa lagu magacaabi doonaa xeer uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

3) Madax kasta wuxuu mas,uul ka yahay habsami u socodka qaybtiisa dhan hawleed, dhan dhaqaale iyo dhanka asluubta shaqaalaha.

Qodobka 10aad

XILKA MAAREEYAHA GUUD

1) Maareeyaha Guud wuxuu leeyahay awood iyo mas,uuliyad la siman tan uu agaasimaha Guud ee Wasaarada, sida ku qeexan qod. 3aad ee xeerka lamb. 316/ee 17.12.1962 ;

2) Maareeyaha Guud Xilkiisa wuxuu yahay

b) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka ka tahay, isagoo oggolaansho ka haysta wasiirka wasaarada Macdanta iyo Biyaha;

t) Inuu mas,uul ka yahay habka maamulka shaqada Wakaalada wuxuuna awood u leeyahay inuu saameeyo wixii qaraar ah ee ku saabsan Maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda:

j) Inuu ku dhaqaaqo wixii qaraar ah oo deg-deg ah, isagoo isla markaas ogaysiinaya wasiirka wasaaradda Macdanta iyo Biyaha

x) Inuu bixiyo wixii amaah lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fican ugu socdaan;

kh) Inuu fuliyo wixii hawl maamulka shaqada Wakaaladdu ee caadi ah isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

3) Markuu ka maqan yahay Maareeyaha Guud shaqada ama ay

Qodobka 11aad

## XUQUUQDA QAYNUUNIGA IYO DHAQAALAHA EE SHAQAALAHA WAKAALADDA

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Maareeyayaasha, Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona xeerka lam. 36. ee 22.4.1872, kuna saabsan shaqaalaha Wakaaladda iyo Wakaaladaha Madaxa bannaan.

Xuquuqda shaqaalaha oo maalinta sharcigan dhaqan galayo ka tirsan maamulka biyaha, Xamar waxaa lagu wareejiyay Wakaaladda Biyaha Xamar, iyagoo loo aqoonsaday shaqadii hore in ay tahay mid sii socota (riconoscimento di continuita, di lavoro e di anzianita di servizio dalla data di assunzione), laga bilaabo maalinta qof kasta la qoray, waxayna la mid yihiin dhanka xuquuqda iyo dhaqanka dhaqaalahaba shaqaalaha Wakaaladda ay qoroto.

Qodobka 12aad

## QAABKA WAKAALADDA

1) Wakaaladdu waxay yeelanaysaa qaab la xiriira dhismaheeda;

2) Qaabka Wakaaladda Biyaha Xamar waxaa lagu soo saari doonaa Xeer uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S., isagoo tixgelinaaya talada uu soo jeediyo Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha.

Qaabka Wakaaladda waa in lagu dhammeeyaa muddo 6 (lix) bilood, laga bilaabo maalinta sharcigan uu dhaqan galo.

Qodobka 13aad

## HANTIDA WAKAALADDA

Hantida Wakaaladdu waxay ka kooban tahay ;

1) Lacagta u keydsan maamulka hore ee Biyaha Xamar;

2) Lacagta kasoo geleysa iibka biyaha guryaha meelaha ganacsiga ama Hay'adaha Dawladda;

3) Wixii lacag ah oo deeq ahaan loo siiyo Wakaaladda iyo wixii deyn ah oo ay ku fulinayaan Mashaariic cusub ee hawshooda la xiriirta.

Qodobka 14aad

AMAAH SHARCI AH

1) Wakaaladdu si ay u hirgeliso hawlaheeda lacag waxay ka amaahan kartaa Bankiyada Dawladda iyo meelihii kale oo ku habboon, ayadoo haysata guddoonka Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

2) Marka amaaha lagala xaajoonayo Bankiyada dibedda ah ama Hay'adaha kale Wakaaladdu waxay tahay mid si sharci ahaan wakiil ka noqon karta Dawladda Soomaaliyeed.

Qodobka 15aad

XISAABTA SANNADKA

Xisaabta sannadka wuxuu ka bilaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31 Disheembar ee sannad waliba.

Qodobka 16aad

MIISAANIYADDA WAKAALADDA

a) Miisaaniyadda socota (preventivo):-

1) Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30 Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta, waa inuu isku dubbaridaa miisaaniyadda caadiga ah iyo tan horumarinta ee ku saabsan sannadka soo socda, isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, waxaanu hor dhigi doonaa si loo oggolaado Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda ;

2) Sannadka lacagta ee Wakaaladda wuxuu billaabanayaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaanayaa 31 Disembar ee sannad walba.

b) Xiritaanka Miisaaniyadda (Consuntivo) ;-

1) Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa xiritaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isagoo iska hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka iyo khasaaraha Wakaaladda, taana uu u gudbiyaa Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha iyo kan Maaliyadda.

2) Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda wuxuu awood u leeyahay isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Macdanta &. Biyaha inuu oggolaado xiritaanka miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharajka ay bixineyso Wakaaladdu.

Qodobka 17aad

MAAMULKA IYO KORMEERKA XISAABAHA

1) Wakaaladdu had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ay ku dhaqan gelisaa adduunka iyo hawlaha kale ee lacagta ku saabsan, iyadoo ilaalinaysa sida habboon ee qawaaniinta iyo xeerarka qaranka ku xusan

2) Wakaaladdu waxay hawsheeda ku maamuli doontaa dakhliga kasoo xerooda hawsha ay qabato waana inay lacag u kaydisaa qiimaha alaabta, sida ugu haboon u maamushaa kaydkaas.

3) Xisaabaha wakaaladdu Wasiirka Wasaaradda Macdanta & Biyaha ama cid isaga ka wakiil ah ka sokow waxa kormeeri doona Laanta goonida ah ee Wakaaladaha Macdanta iyo Biyaha.

Qodobka 18aad

Qalabka iyo alaabta u soo dega Wakaaladda Biyaha Xamar lana xiriira soo saarka, socodsiinta iyo qaybinta biyah[a],waxaa laga dhaafay canshuruudda furdada (import duty).

Qodobka 19aad

XEER GUUD

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaaya talada Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha inuu soo saaro xeer nidaamiye oo lagu faahfaahinayaa sharcigan laguna hirgelinayaa habka ugu wacan oo hawsha wakaaladda ay ku fulin doonto ama looga hortagaayo dhibaatooyinka ka iman kara fulinta xilka Wakaaladda.

Qodobka 20aad

TIRTIRID

Sharci ama xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 21aad

DHAQAN GELID

1) Sharcigan hore ayuu ka dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

2) Sharcigan waa inuu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah ee J.D.S.

3) Qof waliba waa inuu dhowraa, tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale inay dhawraan sharcigaa.-

Muqdisho 6 Abriile 1978

MADAXWEYANHA J.D.S.
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 19 ee 6 Abr. 78, Guddiga Iibka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha.-

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada kala ah 1, 17, 18 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lambarkiisu yahay 27 ee 27 Febraayo 1977 ee lagu dhisay Guddiga Sare ee Dhaqaalaha;

ISAGOO ARKAY : Sharci lagu dhisay guddiga oggolaanshaha lacagta Qalaad (Commissione di Valuta Estera) ee lam. yahay D.L. N. 12 del 26 Sept. 1964.

ISAGOO ARKAY : Xeerka lambarkiisu yahay Xeer Wasiireed (D.M.) 264 ee 25.11.64 ee lagu dhisay Guddiga bixiya ruqsadda Beecmushtarka (Licesing Committee);

ISAGOO AQOONSADAY : Baahida weyn oo loo qabo in la dhiso guddi ku qaybsan Iibka iyo horu-dhigidda Dhaqaalaha ee heer Qaran ah ;

ISAGOO AQOONSADAY : In hawsha Iibka guddiga iyo Horu-dhigidda Dhaqaalaha loo xilsaaro Xubno ka tirsan Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee Golaha Dhexe ee X.H.K.S. ee 20kii Febraayo, 1978;

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA :

Qodobka 1aad

Marka laga bilaabo 20kii Febraayo, 1978 waxaa la dhisay Guddiga Iibka iyo Horu-dhigidda Dhaqaalaha.

Qodobka 2aad

Xubnaha Guddiga oo lagu sheegay Qodobka 1aad ee Sharcigan iyo guddoomiyahiisa waxay ka tirsan yihiin Golaha Dhexe ee X.H.K.S.

Qodobka 3aad

Xubnaha Guddiga waxaa kala soo qayb galaya shirarkooda oo lagu falanqeynayo hawlaha Guddiga Guddoomiyaha Xiriirka Guud ee Shaqaalaha ama qof ka wakiil ah oo aqoon fiican u leh arrimaha kor ku xusan ee isla qodobkan, asagoon ka ahayn Guddiga Xubin rasmi ah (Membro non effettivo).

Qodobka 4aad

HOWSHA GUDIGA

B) Gudiga waxay hawshiisa tahay inuu baaro hubiyo nooca iyo sicirka isla markaana amro ama ogolaado wax kastoo gudaha dalka ama dibadda uu Qaranka ama Xubin dowladda ka mid ahi ka soo gadanayso Guddiga markastoo uu ruqsaynayo ama-ba amrayo wax ka sooiibsiga dibadda, wuxuu Guddiga kala tashanayaa Wasaaradda Ganacsiga, Wasaaradda Maaliyadda iyo Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.

T) Gudiga wuxuu awood u leeyahay inuu daneeyo, hubsado waxa la xiriira hufnaanta iyo habsami u socodsiinta ganacsiga gudaha Gudigu wuxuu kaloo awood u leeyahay in qof kastoo ku johor fala iibka hufan in uu sharciga la tiigsado iyadoo qofkaasi la hor-geynayo Maxkamadaha ama hay'adaha loo xilsaaray inay ku garsooraan sharciga.

J ) Howsha Guddiga waxaa ka mid ah hawshii Guddiga oggolaa-nshaha lacagaha qalaad (Commissione di Valuta Estera) ee la-gu dhisay sharciga lambarkiisu yahay 12 ee Set. 1964.

X) Waxaa howsha Guddiga ka mid noqoneysa oo kale howshii Guddiga bixinta ruqsadaha Beecmushtarka (Licensing Com-mittee) oo lagu dhisay Xeerka lambarkiisu yahay D.M.N. 264 ee 25.11.1964.

Qodobka 5aad

Sharcigan waxba ka bedeli maayo xilka iyo awoodda Gudiga Dha-qaalaha ee lagu dhisay sharciga lambarkiisu yahay 27 ee 27kii Febaraayo 1977.

Qodobka 6aad

Xubnaha Gudiga lagu dhisay Sharcigan waxay xubno rasmi ah ka yihiin Gudiga sare ee Dhaqaalaha.

Qodobka 7aad

Madaxwaynaha J.D.S. wuxuu soo soori karaa Xeer hooseed ah ee lagu faahfaahinayo ama lagu hirgelinaayo Sharcigan.

Qodobka 8aad

Sharci kasta oo aan la socon karin sharcigan ama ka soo horjee-da waa la buriyey.

Qodobka 9aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga billaabo 20kii Feb-raayo 1978, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 10 Apr. 1978